

## Adeegyada Caafimaadka Dadweynaha Hamilton ee Baaritaanka Tallaalka iyo Habka Hawl-ka-joojinta

### 1. Sabatee baan u helay warqadda baaritaanka tallaalka?

- Si aan kuu ogeysiino in diiwaanka tallaalka ilmahaaga ee caafimaadka dadweynaha uusan dhameystirneyn oo tallaalo ka dhiman yihiin.
- Diiwaannada tallaalka carruurnimada waa in loo geeyaa Caafimaadka Dadweynaha sida uu qabo sharciga ka mid Xeerka Tallaalka Ardayda Dugsiga (ISPA)
- Fiiri kaarka tallaalka jaalaha ah ee ilmahaaga si aad u aragto in ilmahaagu qaateen tallaalladii loo baahnaa iyo in kale. Haddii aadan hubin, la hadal daryeel caafimaad bixiye. Tallaaladu aad bay waxtar ugu leeyihiin ka hortagga cudurrada halista ah ee tallaalka looga hortagi karo waxayna muhiim u yihiin ilaalinta dhammaan bulshada dhexdeeda.

### 2. Waa maxay ISPA?

- Waa Sharci Ontaariyo oo waajib ka dhigaya in ardayda laga tallaalo cudurrada qaarkood ama ay heystaan ka-cafin sharci ah.
- Hadafka ISPA waa in la ilaaliyo caafimaadka carruurta iyo laga hortago cudurro ka dillaaca dugsiyada.
- Haddii talaalladu aysan dhameystirneyn ama ka-cafin sharci ah aysan kuugu jirin faylka, waxaa laga yaabaa in ilmaha laga joojiyo dugsiga.

### 3. What maxay tallaalada loo baahan sida qabto ISPA?

- gawracatada, xiiq-dheerta (qufac xiiqdheer), teetanada, dabaysha
- jadeecada, qaamo-qashiirta (jadeecada jarmalka)
- varicella (bus-bus; kuwa dhashay 2010 iyo wixii ka dambeeya)
- qoorgooye

### 4. Maxaa dhacaya haddii ilmahaaga u baahan yahay in la tallaalo?

- Booqo daryeel bixiyaha caafimaadkaaga (tusaale, takhtarka qoyska, daryeel bixiye kale ama rugta la tago ballaan la'aanta).
- Daryeel bixiyaha caafimaadka ayaa siin kara tallaallada lagama maarmaanka ah si loo hubiyo in ilmahaaga tallaaladoodu dhameystiran yihiin.

### 5. Maxaa dhacaya haddii aanan cusboonaysiin diiwaanka tallaalka ilmahaaga?

- Ilmahaaga waxaa laga yaabaa in laga joojiyo dugsiga ilaa 20 maalmood oo dugsiyeed ama ilaa diiwaanka tallaalka ilmahaaga la cusbeyneysiiyo, ama tallaalka ka-cafin loo gudbiyo Caafimaadka Dadweynaha.

### 6. Waa Maxay sababta aan u helay warqadda amarka joojinta ah?

- Waxa loogu talo galay haddii diiwaanka tallaalka ardaygu aanu dhameystirneyn ka dib warqadda baarista.
- Amarka wuxuu ku siinayaa taariikhda kama dambaysta ah in lagu soo gudbinayo diiwaanka tallaalka ee ugu dambeeyay ama ka-cafinta, si looga hortago in dugsiga laga joojiyo ardeyga.

### 7. Sideen u soo sheegaa tallaalada ilmahaaga?

- **Intarnt ku soo gudbi:** <https://hph.icon.ehealthontario.ca/#!/welcome> ama sawir ka qaad QR code-ka hoose. Fadlan sawirka aad qaaday upload ku samee ama sawirka dukumeentiyada hore oo tallaalka.
- **Cinwaanka boostadal:** City of Hamilton, Public Health Services, Vaccine Program P.O. Box 897, Hamilton, Ontario, L8N 3P6
- **Telefoonka soo sheegidda:** wac diiwaanka tallaalada 905-540-5250

### Macluumaad Dheeri ah

- Macluumaadka Guud tallaalka [www.hamilton.ca/vaccines](http://www.hamilton.ca/vaccines)
- Rugaha Tallaalka Dugsiga [www.hamilton.ca/schoolclinics](http://www.hamilton.ca/schoolclinics)

